

HOYGA QOYSASKA



- waa goobta kulanka, taageerada iyo hogaaminta ee loogu talagalay carruurta, dhallinyarada iyo waalidiinta



VÄSTERÅS STAD
Fritid och Förebyggande

Hoyga qoysaska wuxuu waalidiinta, carruurta iyo dhallinyarada ba siiyaa taageero iyo hogaamin. Tusaaleha dhaqdhaqaaqyada degmooyinka kala duwan aan ka hirgelinno, waxaa kamid ah öppen förskola (dugsiyada horudhaca ee albaabada u furan), hogaaminta waalidiinta, tababarka waalidiinta iyo dhaqdhaqaaqyo lamid ah.

Dhammaan shaqaalaha Hoyga qoysaska waxay tixgeliyaan sirta xirfadda. Teeda kale, wax xasuus-qor ah ma qoraan.

Hoyga qoysaska waxaa laga hela **hogaaminta waalidiinta** iyadoo fiirogaar ah la siinaayo waalidnimada iyo carruurta. Tusaaleha ammuuraha waxay noqon karaan iska horimadyo, dugsi ka dhuumasho, walwalka carruurta, diidmo cad, dhaqanxummo ama saaxiib-dirir. Wada-hadal gooni gooni ah ama wadajir ayaa suurtagal noqon karto.

Xitaa haddii ay jiraan ammuuro kale oo xiriir la leh xaalad-noololeedkaaga waad kala xiriiri kartaa Hoyga qoysaska. Waxaan ka caawini karnaa sidii aad ula xiriiri lahayd hay'adda arrinta ay khuseeyso. Hoyga qoysaska wuxuu kaloo taageero siiyaa tusaale ahaan shaqaalaha dugsiyada horudhaca, dugsiyada iyo goobaha wakhtilummiska.

Öppna förskolan (Dugsiga horudhaca ee albaabada u furan) waa goob qoysaska carruurta yaryar leh ay ku kulmaan. Waa dhaqdhaqaaq qof kasta ka faa'iideysan karo, waxaana laga hela dhaqdhaqaaqyo kala duwan, taasoo waalidiinta iyo carruurta u suurtagelinayso yeelashada xiriir cusub iyo wada-hadallo. Markii aad doontaan ayaa booqan kartaan ku aadan saacadaha goobta ay furan tahay.

Hoyga qoysaska waxaa kaloo laga hela **tababarka waalidiinta** xilliga carruurta ay korayaan oo idil. Waxaan la wada shaqaynaa rugta hooyoyinka iyo rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta, sida aan taageero ku siinno waalidiinta horey wax u dhalay iyo kuwa cusub ba. Waalidiinta leh carruurta dhowr sano jirka ah iyo dhallinyarada baa waxay naga helayaan tababarka waalidiinta leh taageerda cilmibaarista. Tababarka waalidiinta wuxuu ku salaysan yahay ku hawlgaka waxa wanaagsan oo lagu dhaqan geli karo.

Hawlgalka Hoyga qoysaska waxaa weeyaan hawl fududaynta wada-shaqaynta degmooyinka kala duwan iyo hogaaminta ammuuraha horumarka. Siyaabo kala duwan ayaan ugu hawlgalna sidii adiga oo ku nool degmada, ku heli lahayd fursad aad gacan ka geysato, saamaynna ugu yeelato sida degmodaada loo horumariyo.

La xiriir Hoyga qoysaska ku yaallo agagaarkaaga

Hoyga qoysaska Bäckby

Öppna förskolan 021-39 88 46
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska carruurta 021-39 85 90
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska dhallinyarada 021-39 88 47
Shaqada degmada 021-39 84 07

Hoyga qoysaska Odensvi

Öppna förskolan 021-39 25 88
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska carruurta 021-39 41 88
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska dhallinyarada 021-39 41 84
Shaqada degmada 021-39 41 83

Hoyga qoysaska Råby

Öppna förskolan 021-39 84 09
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska carruurta 021-39 84 22
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska dhallinyarada 021-39 84 25
Shaqada degmada 021-39 84 08

Hoyga qoysaska Skallberget

Öppna förskolan 021-39 03 26
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska carruurta 021-39 14 74
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska dhallinyarada 021-39 20 69

Hoyga qoysaska Skultuna

Öppna förskolan 021-39 38 67
Shaqada degmada 021-39 38 66

Hoyga qoysaska Vallby

Öppna förskolan 021-39 86 29
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska carruurta 021-39 87 33
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska dhallinyarada 021-39 86 17
Shaqada degmada 021-39 87 18

Hoyga qoysaska Viksång

Öppna förskolan 021-39 23 35
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska carruurta 021-39 24 04
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska dhallinyarada 021-39 44 63
Shaqada degmada 021-39 23 34

Hoyga qoysaska Önsta

Önsta Öppna förskolan 021-39 40 54
Rönby Öppna förskolan 021-39 36 26
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska carruurta 021-39 36 10
Hogaamiyeha arrimaha
qoysaska dhallinyarada 021-39 34 12
Shaqada degmada 021-39 36 19

Warbixin dheeraad ah ku saabsan Hoyga qoysaska waxaad ka akhrisan kartaa
www.vasteras.se

